



Machadka Internetka Dugsiyada Magaalada Westerville (WVA, Westerville Virtual Academy) Sanno Dugsiyeedka 2020/2021 - Foomka Diiwaan Gelinta

Taariikhda Diiwaan Gelinta: _____ Taariikhda Dhallashada Ardayga: _____

Magaca Dambe Ardayga: _____ Magaca Kowaad Ardayga: _____

Dugsiga Guriga Ardayga: _____ Heerka Darajada Ardayga: _____

Aqoonsiga Ardayga (ID)#: _____

Cinwaanka Ardayga: _____ Magaalada: _____ Zip Code: _____

Ardayga ma leeyahay IEP ama 504? Haddii ay haa tahay, fadlan tilmaan: _____

Ardaygaada ma qaataa adeegyada barashada Ingiriisiga?: _____ Maya _____ Haa

Waxaan rabaa cunugeyga in uu ka-qeybgalo si uu u qaato adeegyada raashinka, cuntada lagu qeybiyo meelaha loogu talagalay.

_____ Maya _____ Haa

Maalin kasta waqtigee ayaad fileysaa in ardayga uu dhamaystiro hawsha dugsiga? Dooro hal qorshe:

_____ Subaxnimada/Galabnimada _____ Galabnimada/Fiidkii

Maxuu noqon doonaa qorshaha qoyskaada marka maaadada ku adkaato cunugaada, una diyaarsaneen in uu fahmo? (Tusaale: Email u dir macalinka, wac kaddibna fariin u dhaaf macalinka, iwm.)

Fadlan tilmaan: _____

DUGSIGA HOOSE: Ardayda dugsiga hoose waxaa lagu qori doonaa koorsooyinka 4ta muhiimka ah (Ingiriisiga, xisaabta, sayniska iyo daraasaadka bulshada), heerka darajada ku habboon. Intaas kaddib, waxay qaadan doonaan labo xullasho sida ku qoran linkiga soo socdo: <https://tinyurl.com/WVAElemCourseOverviewByGrade>.

DUGSIGA DHEXE: Ardayda dugsiga Dhexe (MS) waxaa lagu qori doonaa 4ta koorsooyinka muhiimka ah (Ingiriisiga, xisaabta, sayniska iyo daraasaadka bulshada) heerka darajada ku habboon, taasoo ku saleysan waxa uu ku biiriyo la-talliyaha dugsiga. Fadlan dooro labo maadooyinka la xusho si laguugu qoro - mid halkii samastar. Ardayda waa in aysan qaadanin in ka badan iskudarka 1.0 koorsooyinka la xusho, iyo waa in ay qaataan buundada dugsiga sare (HS) xagga koorsooyinka qaar. Si aad u heshid sharaxaadda koorisada la xusho, tag: <https://tinyurl.com/WVACourseElectiveSyllabi>

_____ Mabaadiida Cilmiga Caafimaadka (Principles of Health Sciences) (Darajada 6-8 – 1.0 Xulashada MS)-koorsada socoto sannadka oo idil

_____ Madaniga MS (MS Civics) (Darajada 6-8 – 1.0 Xulashada MS)-koorsada socoto sannadka oo idil

_____ Dareenka Fanka (Art Appreciation) (Darajada 8 keliya - .5 Abaal Marinta Buundada Fanka Hal Abuurka HS (.5 HS Fine Arts Credit Awarded)-samastarka

_____ Dareenka Muusikada (Music Appreciation) (Darajada 8 keliya - .5 Abaal Marinta Buundada Fanka Hal Abuurka HS (.5 HS Fine Arts Credit Awarded)-samastarka

_____ Aqoonta Meediyaha (Media Literacy) (Darajada 8 keliya – .5 Abaal Marinta Buundada Fanka Luqadda Ingiriisiga (0.5 HS English Language Arts Credit Awarded)-samastarka

_____ Qorista Hal Abuurka (Creative Writing) (Darajada 8 keliya – .5 Abaal Marinta Buundada Fanka Luqadda Ingiriisiga HS (0.5 HS English Language Arts Credit Awarded)-samastarka

_____ Isbanish 1 (Darajada 8 keliya – 1.0 Abaal Marinta Buundada Luqadda Dunida HS (1.0 HS World Language Credit Awarded)-koorso socoto sannadka oo idil

DUGSIGA SARE: Ardayda dugsiga sare (HS) waxaa lagu qori doonaa koorsooyinka laga soo codsaday habka jadwalkii hore lana raaciyay waxa uu ku biiriyo la-talliyaha dugsiga. Koorsooyinka qaar, waxaa laga heli karaa fasalada Sharafta (Honors) iyo AP. Waxaan jadwalkaada WVA la saffi doonaa jadwalkaada hore ilaa inta suurtoogalka ah. Marka la saffidda aan la heli karin, waxaa kula soo xariiri doono xubin ka tirsan shaqaalaha si loo helo fursado kale. Fadlan waxaad codsiga jadwalka dheeraadka ku tilmaantaa meesha hoose ee lagu siiyay. Si aad u qaadatid daruusta koorisada, tag: <https://www.apexlearningvs.com/course-catalog>

Ardayga wuxuu u baahan yahay **Kombuyutar** si uu u sameeyo shaqada dugsiga: _____ Maya _____ Haa

Ardayga wuxuu u baahan yahay **Wi-Fi** si uu u sameeyo shaqada dugsiga: _____ Maya _____ Haa



Magaca Waalidka/Ilaaliyaha: _____

Telefoonka Waalidka/Ilaaliyaha: _____

Emailka Waalidka/Ilaaliyaha: _____

Ardayga in uu Aqoonsado iyo Fahmo Waxaa Laga Filaayo:

Sida arday ku qoran Machadka Internetka Dugsiga Magaalada Westerville (WVA, Westerville Virtual Academy),

Aniga waxaan la socdaa in:

- Ka-qeybgalka brograamkaan waa axsaan la samayay, sidaas darteed, Aniga waxaa leyga filaa in aan raaco xeerka dhaqanka iyo sharafta ugu sareeyso bacdamaa aan ahay wakii ka socda dugsiga dagmadeyda.
- Aniga waxaan fahamsanahay in aan mas'uul ka ahay gelitaanka internetka marka aan ku hawlanahay koorsooyinka ku jira brograamka qofka ku kooban ee WVA. Haddii aan dhibaato kala kulmo gelitaanka, waxaan la xariiri doonaa leenka loo samayay kaalmada WVA si loo sameeyo qorshooyin kale.
- Aniga waxaan raaci doonaa waqtiyada dugsiga ee la xariira dhamaystirka sharuudaha koorsada.
- Arday ahaan, Aniga waxaa leyga filaa heerarka qaar. Looma dulqaadan doono marka nooc kasta internetka loo isticmaalo si aan habbooneyn. Waxaa kaloo lagu dabaqaa dhamaan qodobada Siyaasadda Icticmaalka La Ogolaan karo (Acceptable Use Policy) Karo ee dagmada.
- Wax kasta aan ku sameeyo koorsooyinka waa la soo saari karaa, waxaana la socon kara shaqaalaha dugsiga waqti kasta.

Hababka koorsada loo baahan yahay in la raaco waa:

- Waa in aan si joogto ah ula xariiro, u jawaabo, xariir la yeesho xubinta shaqaalaha WVA samaysay.
- Leyma ogola in aan dibadda uga baxo brograamka koorsada si aan u raadiyo jawaabaha Aniga oo adeegsada Google, koobi ka samaysto, kaadibna ku dhajio bacdamaa taasi loo aqoonsan yahay xattooyo shaqada qof kale.
- Aniga waa in aan raaco dhamaan waxa la filaayo sida ay sheegto dagmada iyo WVA.

Horumarka la filaayo waa:

- In horumar la gaaro todobaad kasta waa waajib. Haddii maqnaashada tahay mid aan laga maarmin oo macquul ah, ardayga waa in uu la xariiro xubinta shaqaalaha loo xil saaray. In aan hormar ku filan la gaarin in ka badan afar (4) todobaad halkii samastar waxay dhallin kartaa in ardayga laga saaro brograamka.
- Aniga waxaan fahamsanahay in koorsooyinka lagu soo taxi doono shahaadadeyda/warbixinta horumarka. Darajada ley siiyo waxay qeyb ka ahaan doontaa diiwaankeyga rasmiga ee dugsiga, waxaana la gelin doonaa Isku Celceliska Buundada (Grade Point Average) (GPA) haddii lagu dabaqi karo.

Ciqaabta la socoto Jebinta (kana mid ah qaadashada shaqada arday kale):

- Gafka 1aad: waxaa ley siin doonaa digniinta afka. Waxaa la ogeysiin doonaa waalidiinteyda iyo shaqaalaha dugsiga ku habboon.
- Gafka 2aad: Waxaa ley siin doonaa digniin qoran. Waxaa la ogeysiin doonaa waalidiinteyda iyo shaqaalaha dugsiga ku habboon. Waxaa dhici karto in leyga saaro brograamka WVA
- Dhaqan Xumada Darran: Wuxuu ahaadaba xattaa haddii gafka yahay gafka kowaad, waxaa dhici karto in leyga saaro brograamka WVA.

Aniga waxaan waafaqsanahay Waxa ay Fileyso WVA (Expectations):

Saxiixa Ardayga: _____

Aqoonsiga iyo Fahamka Waxa Laga Filaayo Waalidka/Ilaaliyaha Sharciga. Saxiixaada hoose wuxuu muujiyaa:

- Aniga waxaan akhristay iyo waan fahmay waxa Machadka Internetka Dugsiga Magaalada Westerville (WVA, Westerville Virtual Academy) ka fileyso cunugeyga.
- Aniga waxaan fahamsanahay in ka-qeybgalka waxbarashada cunugeyga ay kaalmo ka geysan doonto guusha uu ka gaaro brograamka.
- Aniga waxaan fahamsanahay in diiwaan gelinta cunugeyga socon doonto ugu yaraan samastarka kowaad sannad dugsiyeedka 2020/2021.
- Aniga waxaan la socon doonaa iyo waxaan cunugeyga ku taageeri doonaa waxbarashadiisa.
- Aniga waxaan waafaqsanahay in leyla soo xariiri karo iyo in aan diyaar u ahaado Shaqaalaha Dugsiga Magaalada Westerville (Westerville City School Staff) si aan kala hadlo horumarka iyo koriimada uu gaaro cunugeyga.
- Aniga waxaan fahamsanahay in maamulka waqtiga iyo imaashada ay muhiim u yahiin guusha cunugeyga.
- Aniga waxaan fahamsanahay in ogolaashada ley ogolaaday brograamkaan tahay axsaan, iyo in ay waajib ku tahay cunugeyga in uu raaco waxyaabaha laga filaayo ee la tilmaamay si uu ugu sii qornaado.

Aniga waxaan waafaqsanahay waxa ay fileyso WVA (WVA Expectations):

Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha Sharciga: _____